

Ciidamada Bada ee Midawga Yurub waxay warbaahinta Soomaaliya iyo Jabuuti ku qaadeen dusha markabka ciidanka bada

Maalintii Axada ee 2da Diisanbar 2012, Taliyaha Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ee hawlgalka Atalaanta (EU NAVFOR), Admiral dhexe Enrico Credendino, waxaa uu la kulmay warbaahin Soomaali iyo Jabuutiyaan isugu jira, kulanka oo ka dhacay dusha markabka ciidamda Midawga Yurub ee ITS San Giusto, kaas oo joogay duleedka magaalada Berbera.

Dhacdadan waxay ahayd fursadii ugu horaysay ee ay warbaahinta Soomaalidu ay bada ugula kulmaan Taliyaha Ciidamada Bada ee Midawga Yurub. Tani waxay warbaahinta gobolka u sahashay iny indha-indheeyaan awooda unugyada Ciidamada Bada ee Midawga Yurub ay kula tacaalaan budhcad-badeeda gudaha Gacanka Cadmeed iyo Bawadwaynta Hindiya. Sidaas awgeed, wariyayaasha waxaa si faahfaahsan looga waramay xilka iyo ujeedooyinka hawlgalka Atalaanta iyo waliba guud ahaan aragtida ku aadan budhcad-badeednimada Bariga Afrika.

“Maanta waxay noo tahay fursad heersare ah inaan bada dusheeda idiinku sharaxno hadafkayaga iyo awoodahayaga” ayuu yidhi Admeral dhexe Credendino, isagoo raaciyay “fariintayda ku aadan dadka Soomaaliya iyo gobolkaba waa inaan halkan u joogno inaan iyaga la shaqayno oo aan la dagaalno budhcad-badeednimda taas oo saamayn daran ku yeelatay dalkooda”